




Xuquuqda dadka-hbtq oo Iswiidhan



Warqadaan warbixinta waxey ku socotaa adiga dhallinyaro oo ah dadka-hbtq iyo dhawaan imaaday Iswiidhan. Dadka-Hbtq waxaa laga wadaa qof khaniis, galmo la sameeye labada jinsi, ahaade labada jinsi iyo queerka. Warqadaan warbixinta adiga waxaad ka heleysaa warbixin ku saabsan adiga xuquuqyada aad leedahaya haddii aad tahay dadka-hbtq oo ku nool Iswiidhan. Bogga ugu dambeeyo adiga waxaad ka heli ururo, xafiyo dawlad iyo ciwaano internet oo warbixin kale, caawinaad iyo kaalmo.

Sharciyada Iswiidhan waxey ku salisanyahay wada heshiinta caalamiga oo UN oo xuquuqda bina'aadamka. Waxaa loola jeedaa in dhammaan dadka isku qiimo leeyahiin iyo isku xuquuq leeyahiin. Ma bannaana in laguu hanjabo, lagu jir dilo ama si xun laguula dhaqmo sabab u tahay inaa tahay qof khaniis, galmo la sameeye labada jinsi, ahaade labada jinsi ama queerka.

## Codsasho magangelyo

Haddii adiga tahay qof wadankiisa hooyo lagu dhibaateynaayo oo taasna sabab u tahay inaa tahay dadka-hbtq adiga waxaad xaq u leedahay inaad magangelyo ka codsatit Iswiidhan arrintaas darteed. Aad bey muhiim u tahay in adiga sida ugu dhaqsaha badan intuu codsiga magangelyada bilaawga yahay sheektid sababta adiga u codsaneysid magangelyo iyo wixii kugu soo dhacay ama waxaa ka cabsaneysid iney kugu dhacaan wadankaa adiga ka imaatay. Magangelyo waxaa laga codsankara xuduudka wadanka ama xafiiska Hey'adda socdaalka.

Haddii adiga magangelyo Iswiidhan ka codsaneysid oo sababtu tahay in adiga tahay dadka-hbtq oo la dhibaateeyo adiga waxaad la soo xiriiri-kartaa kooxda isku xiran oo la dhaho RFSL Newcomers sidaa u heshid caawinaad iyo kaalmeen oo arrinta magangelydoonida.

## Jeceilka iyo isla noolanshada

Adiga waxaad xaq u leedahay inaad jeclaankartid qofkaa dooneysid iyo noolaan kartid nolol qofka aad tahay. Haddii adiga la socotid qof aad isku jinsi tahiin adinka waxaad xaq u leedahiin in jeceilkiina sidaa dooneysiin u muujisiin. Haddii adiga aad 18 sano ka weeyntahay adiga waxaad guursan kartaa qofkaa dooneysid oo jinsi doonaayo ha ahaado. Iswiidhan waxaa ku nool dad badan oo ah dadka-hbtq oona ah waalid iyo adiga tusaale ahaan waxaad xaq u leedahay daryeelid uur qaadirid ama kafaalo qaado carruur sida dadka kale camal.

## Galmo suubin

Intey dadka ka qeyb-qaadanaayaan ey doonaayaan iney isla suubiyaan galmo adiga qofkaa dooneysid baa galmo la suubinkartaa oo ha ahaada isku jinsi ama yuusan ahaan. Qof ka weeyn 15 sano lama suubinkaro galmo qof ka yar 15 sano. Waa sharcyan dambi. Laakiin sharcigu ma diidana in labo qof oo oo 15 sano ka yar galmo isla suubiyaan, haddii labadooda ey doonaayaan.

## Markaa adiga waxbarasho dhiganeysid

Markaa adiga joogtid dugsiga iyo jaamacada adiga waxaad xaq u leedahay inaa ahaatid qofkaa dooneysid iyo dareemikartid aamin. Qofna, ha ahaado macallin ama ardeykale ma u bannaana in si xun kuula dhaqmaan, is qaldan kuula hadlaan oo sababeyso adiga galmo jeceilkaada, adiga shaqsyan jinsi ahaantaada ama jinsiga aad dooneysid inaad ahaatid ama si qaldan uga hadlaan dadka-hbtq.

## Markaa adiga shaqeyneysid

Sida markaa adiga joogtid dugsiga camal adiga waxaad xaq u leedahay inaa ahaatid qofkaa dooneysid iyo dareemikartid aamin markaa joogtid goobta shaqada, goobta shaqo tababarida iyo markaa adiga shaqo raadineysid. Ha ahaado shaqaalaha kula shaqeynaayo ama maamulahaada ma u bannaana in ey wax ka dhahaan adiga galmo jeceilkaada, adiga shaqsyan jinsi ahaantaada ama jinsiga aad dooneysid inaad ahaatid si qaldan wax kaa dhahaa, ama si xun ha uga hadlaan dadka ah khaniiska, galmo la sameeye labada jinsi, ahaade labada jinsi iyo queer.

## Haddii adiga daryeel isbital doonatid

Adiga galmo jeceilkaada, adiga shaqsyan jinsi ahaantaada ama jinsiga aad dooneysid inaad ahaatid ma bannaana in saameyn ku yeeshaan daryeelka caafimaadka adiga heleysid ama sida ey shaqaalaha daryeelka caafimaadka kuula dhaqmaayaan. Adiga waa in si xushmad leh laguu la dhaqmo iyo dhibaatooyinkaada si micno leh loola dhaqma.

Dhammaan shaqaalaha daryeelka ka shaqeeyo waxaa qaban sharciga sirta. Taasna micnaheeda tahay ineysan qofkale warbixin ka siinkarin warbixin ku quseyso intaa ka eheen dadka ku shaqo leh iney adiga ku caawiyaan, oo laga wadaa shaqaalaha daryeelka isbitalka oo adiga daryeelka caafimaadka ku siin. Ayaga wax warbixin ma siinkaran qoyskaada, ehelkaada ama saaxibadaa haddii adiga aadan dooneyn.

Laakiin ayaga waxaa waajib ku ah iney ashkood u diraan guddiga adeega bulshada haddii ey ka shakiyaan in qof 18 sano ka yar tusaale ahaan jir dil lagu suubiyoo ama guriga lagu xoogo.

In la iska baaro xudurada laga qaado galma (STI) iyo hiv/aids waa u yahii bilaash dhammaan dadka ku nool Iswiidhan.

Adiga oo dhallinyarada ah waxaa jiro qeypta qaabiliaada dhal-linyarad. Meeshaas baa adiga tagikartaa haddii adiga dooneysid inaa weeydiisid su'aalo ku saabsan jirka, galma iyo isla noolaanshada ama haddii adiga dareemeysid caafimaad daro iyo u baahantahay qofaad la hadashi. Qeypta qaabiliaada dhallinyarada adiga waxaad tagikartaa laga bilaabo markaa jirtid 13 sano ilaa adiga ka noqoneysid 20 ama ilaa 25 sano. Bogga internetka [www.umt.se](http://www.umt.se) waxaad adiga heleysaa warbixin meeshaa aad kala xiriireysid qeypta qaabiliaada dhallinyarada oo adiga kuugu dhaw. Meeshaas waxaad xitaa ka heli warbixin ku saabsan jirka, galmo suubin iyo isla noolan shada iyo fursad aad su'alaha aad dooneysid ku weeydiin kartid magac la'aan.

### **Dadka ah labada jinsi oo doonaayo iney jirkooda badalaan iyo sharciyan jinsiga ey yahiiin**

Haddii adiga dooneysid inaa jirkada badashid siduu ugu waafaqsanaan karo jinsigaada adiga waxaad caawinaad ka helikartaa daryeelka isbitaalka oo qallii iyo daryeel daawo qaadasho. Markaas adiga waa in koow suubisaan baaritaan jinsiga aad tahay. Baaritaanka wuxuu gacanta koowaad ku saabsanyahay wada hadlid sidaa oo qofka adiga u aragtid jinsi ahaan inaa tahay. Adiga waxaad xaq u leedahay inaa baaritaankaas marikartid meeshaa doontid Iswiidhan uga noolaaw. Sidaa u tagikartid qeypta qaabilسان suubinta baaritaanka jinsiga aad tahay waxey kala leeyahiin xeer kala duwan oo waxey ku xirantahay meesha aad ku nooshahay. Magaalooyninka badanaa waa in adiga ku gudbiyaan qeypta guud oo arrimaha cilmi nafsiya ama qeypta carruurta iyo dhallinyarada oo cilmi nafsiya(BUP). Magaalooyn kale waxaa ku gudbinkaro qeypta qaabiliaada dhallinyarad



ama dhakhtarka aad xiriirka la leedahay.

Adiga waa in Iswiidhan aad ka diwaangalisantahay sidaa u bilaabikartid baaritaanka jinsiga laakiin adiga ma ubaahnid inaa ahaatid muwaadidin iswiidhish. Adiga waad bilaabikartaa baaritaanka jinsiga haddii aad ka yartahay 18 sano laakiin daryeelka qaarkood iyo sharcijan badalida jinsiga waa inaa buuxisid 18 sano. Adiga xaq waad u leedahay daryeelka haddii xitaa waalidka mas'uulka kaa ah eysan dooneyn. Haddii adiga daryeelka aad wadankale aan eheen Iswiidhan ku soo bilaawday daryeelka isbitaalka inta baa adiga ku caawin.

Haddii adiga dooneysid inaa magacaada koowad badashid sidaa tu-saale ahaan u heshid magac ku waafaqsan jinsiga aad dareemeysid inaa tahay waad suubinkartaa adigoo koow arrinta laguu xaqijin ama xiriir la soo suubin daryeelka. Haddii aad badaleysid magac oo dooneysid in lagu qoro warqadahaada aqoonsiga waxaad la xiriiri Hey'adda cashuura-ha[Skatteverket] ama Patent- och registreringsverket.

### Xafiiska adeega bulshada iyo guri

Xafiiska adeega bulshada waxaa laga helaa degmokasto dhammaan Iswiidhan. Xafiiska adeega bulshada marmar dadka wuu ka caawiyyaa guri, shaqo iyo dhaqaalo. Sida marmarka kale camal adiga waxaad xaq u leedahay i si xushmad leh laguula dhaqmo markaa la xiriirka la leedahay xafiiska adeega bulshada. Ayaga ma u bannaanaa in adiga si xun kuula dhaqmaan, ama su'aalo ka qabaan, adiga galmo jeecelkaada, adiga shaqsiyan jinsi ahaantaada ama jinsiga aad dooneysid inaad ahaatid.

Haddii adiga ku nooshahay guri ey ku geeyeen xafiiska adeega bulshada ama Hey'adda socdaalka ayaga iyo shaqaalaha gurigaas waxey mas'uul ka yahiin in adiga wanaag dareemeyd iyo aamin meesha aad ku nooshahay. Haddii adiga aadan dareemeyn aamin inaa ku tahay guriga aad ku nooshahay oo Hey'adda socdaalka ku geeyeen aad bey muhiim u tahay in adiga sida ugu dhaqsaha badan soo ogeysiisid Hey'adda kormeeriida daryeelka caafimaadka iyo isbitaallada[Inspektionen för vård och omsorg] (IVO) sidey ayaga kuu caawin-

karan adiga. Ayaga shaqadooda baa ah in ey hirgaliyaan in xafiiska adeega bulshada ku dhaqmaan sharciyada iyo xeerarka jiro iyo bixiyaan daryeel wanaagsan ilaa intii suurtagal ah.

### Internet iyo saxaafada bulshada [social media]

Interneka waxaa qaban xeerarka oo wadanka sidiisa kale quseeyo. Taasna micnaheeda tahay in qof sharraf ridid lagu suubinkarin, la dhibeynkarin, loo hanjabikarin ama dhibeyn arrimaha galmo suubinta laguu geleysankarin markaa internetka isticmaleysid. Qofna ma u bannaana in wax xun kaa qoran adiga ama galmo jeecelkaada. Ayaga ma u bannaana xitaa iney wax xun kaa qoran oo adiga ku saabsan maadaama aad tahay qof jecel inuu ahaado labada jinsi. Qofna ma u bannaana iney kuu hanjabaan, kugu qasbaan inaa suubisid ficio galmo ama diran sawiradaada adigoo dooneyn. Ayaga ma kuu soo diri karan xitaa sawiro haddii adiga aadan dooneyn. Haddii adiga lagug suubyo waxyaabaa adiga waxaad la xiriiri oo ku dacwoon boliiska.

## Meelahaan baa adiga caawinaad ka heli

### RFSL Newcomers

Meherada oo RFSL oo la dhaho Newcomers waa koox isku wada xiran oo siiso kaalmeen iyo warbixin dadka wadanka ku cusub oo ah dadka-hbtq. Newcomers waxey adiga kaa caawinkaran warbixin ku saabsan xuquuqyadaada, kugu martiqadi waxbarasho luqada iswiidhishka iyo kaa caawin helida guri. Newcomers waa meel bulshada iskugu imato oo meeshaas adiga waxaad kula kulmikartaa dadkale oo ah dadka-hbtq oo Iswiidhan ku cusub.

[www.rfsl.se/verksamhet/asyl/newcomers/](http://www.rfsl.se/verksamhet/asyl/newcomers/)

## **RFSL - heegaanka dadka dambiga laga galay**

RFSL (Urur qaran oo u da'daalo xuquuqda dadka khaniska, galmo la sameeye labada jinsi, ahaade labada jinsi iyo queerka) waxey leeyahi-in heegaan dadka dambiga laga galay. Meeshaan adiga waxaad la soo xiriirkartaa sidaa u heshid qof aad la hadashid iyo u heshid kaalmeen iyo caawinaad haddii adiga laguu hanjabay, jir dil ama xoogsi galmo.

[www.rfsl.se/verksamhet/brottsofferjour/](http://www.rfsl.se/verksamhet/brottsofferjour/)

## **Hey'adda socdaalka**

Warbixin quseyso dadka-hbtq oo magangelyodoonka ah.

[www.migrationsverket.se/Privatpersoner/Skydd-och-asyl-i-Sverige/For-hbtq-personer.html](http://www.migrationsverket.se/Privatpersoner/Skydd-och-asyl-i-Sverige/For-hbtq-personer.html)

## **Transformering.se - su'aalo ku saabsan arrimaha ahaanshada labada jinsi[trans]**

Boggia internetka oo RFSL oo dhallinyarada transformering.se waxaad adiga ka akhrisankartaa warbixin ku saabsan daryeelka dadka ah labada jinsi iyo xeerarka jiro jyo sidaa u heshid talo iyo aragti iyo jawaabo quseeyo dadka ah labada jinsi[trans].

[www.transformering.se](http://www.transformering.se)

## **Ururada Iswiidhan oo ka hortagida nooctakoorida[Sveriges Antidiskrimineringsbyråer]**

Urur oo isku mideeyo 16 urur oo ka jiro Iswiidhan oo arrimaha ka hortagida nooctakoorida. Meeshaan adiga waxaad la soo xiriirkartaa haddii adiga dareemeysid in lagugu suubiyay nooctakoorid.

[www.adbsverige.se](http://www.adbsverige.se)

## **Pegasus - adiga oo galmo lacag ku badalato**

Haddii adiga aqoon u leedahay inaa galmo lacag ku badalid iyo su'aalo iska weeydiineysid adiga waxaad la soo xiriirkartaa Pegasus sidaa warbixin iyo kaalmeen u heshid. Galmo lagu badasho lacag waxey micnaheeda tahay in qof inuu doonaayo laakiin ku badalan tusaae ahaan lacag, mukhaadaraad, khamri iyo waxyaabo kale. Pegasus waa bogg internet iyo chatt ey ka shaqeeyaan dhallinyarada RFSL[RFSL Ungdom], oo ah urur dhallinyaro. Pegasus wuxuu quseeyaa dadka-hbtq oo jiro 15–25 sano.

[www.pegasus.se](http://www.pegasus.se)

## **UMO.se**

UMO waa bogg internet oo quseeyo dhammaan dadka jiro 13 ilaa 25 sano. Bogga UMO waxaad ka heleysaa adiga jawaabo ku saabsan su'aala laha galmada, caafimaadka iyo wada noolanshada.

[www.umose](http://www.umose)

## **Boliiska[Polisen]**

Dhibeyn, sharrif ridid galmo, hanjabad iyo jir dil waa in ashkood boliska loo gudbiyyaa maadaama ey tahay dambi. Haddii adiga laguu geestay dambigaan oo sabab u tahay adiga galmo jeceelkaada ama in adiga aad tahay qof labada jinsi ah waxaa lagu magacaabaa dambiyada naciibka iyo waa in dambi suubiyaha xukun adag la siiyaa.

[www.polisen.se](http://www.polisen.se)

## **Heegaanka gabdhaha iyo dhallinyarada[Tjej- eller ung-domsjourer]**

Haddii qoyskaada ama qofka aad la nooshahay adiga si xun kuula dhaqmo oo sabab u tahay adiga galmo jeceelkaada, adiga shaqsiyan



jinsi ahaantaada ama jinsiga aad dooneysid inaad ahaatid adiga waxaad caawinaad iyo kaalmeen ka helikartaa xafiiska adeega bulshada iyo heegaanka dhallinyarada. Heegaanka dhallinyarada waxaa laga helaa dhowr meel oo kala duwan wadanka iyo adiga waxey kaa caawin tusale ahaan la xiriirida boliiska, xafiiska adeega bulshada ama daryeelka caafimaadka. Qaarkood waxaa qas u ah iney gabdhaha kaliya iyo qaarkood waxey aqoon qas u leeyahiin dadka khaniiska, galmo la sameeye labada jinsi iyo ahaade labada jinsi. Unizon waxey isku soo ururisay dhammaan heegaanada iyo adiga ku caawin inaad xiriir la yeelatid heegaan sax ah.

[www.unizon.se](http://www.unizon.se)

**Kooxyada qoxootiga guddigooda  
qaranka[Flyktinggruppernas Riksråd] (FARR)**

Farr waa urur oo dadka shaqsiga iyo kooxyada ka shaqeeyo xoojinta xuquuqda dadka magangelyodoonka.

[www.farr.se](http://www.farr.se)

**HIV-Iswiidhan**

Hiv-Iswiidhan waa urur samafal oo ka shaqeeyo nolol wanaajinta dadka qabo hiv.

[www.hiv-sverige.se](http://www.hiv-sverige.se)

**Tilmaame daryeel caafimaad – su'aalaha ku  
saabsan daryeelka isbitaalada**

Bogga internetka oo 1177.se Tilmaame daryeel[Värdguiden] waxaad ka heli warbixin ku saabsan daryeelka caafimaadka oo Iswiidhan. Meeshaas waxaa ku qoran sida ey u shaqeeyaan daryeelka isbitaalada, adiga xuquuqda aad leedahay iyo meeshaa aad la xiriireysid adiga dhibaatooyinka kala duwan. Meeshaas waxaa kale oo ku qoran warbixin

ku saabsan waxa adiga suuinkartid haddii aad dareemeysid inaad helin daryeelka aad xaqaa u leedahay ama si qaldan daryeelka isbitaalka laguu siiyay.

[www.1177.se/Other-languages/New-in-Sweden---healthcare/](http://www.1177.se/Other-languages/New-in-Sweden---healthcare/)

### **Wakiilkha arrimaha nooctakoorida[Diskrimineringsombudsmannen] (DO)**

Dugsiga, nolosha shaqada, daryeelka isbitaalka iyo goobkale bulshada ka wada dhhexeyso – waa mabnuuc sida ku qoran sharciga nooctakoorida – in adiga laguu geeysto dhibeyn, sharraf ridid, sharraf ridid galmo, hanjabad iyo jir dil oo sabab u tahay adiga galmo jeceilkaada, ahaade labada jinsi iyo in adiga aad tahay qof labada jinsi ah. DO waa xafis dawlad oo shaqadeeda tahay in lagu dhaqmo sharciga nooctakoorida. Haddii adiga dooneysid inaad ka ashkootit meherad maadaama adiga u aragtid iney ku xad gudbeen sharciga nooctakoorida ama adiga dooneysid inaa weeydiisid nooctakoorida adiga waxaad la soo xiriirkartaa wakiilkha arrimaha nooctakoorida.

[www.do.se](http://www.do.se)

### **Hey'adda kormeeraida daryeelka caafimaadka iyo isbitaalada (IVO)**

Meeshaan adiga waxaad la soo xiriiri haddii daryeel xun isbitaalka ama xafiiska adeega bulshada kala kulantahay. IVO waa xafis dawladeed.

[www.ivo.se](http://www.ivo.se)

### **Xafiiska adeega bulshada**

Haddii adiga ubaahantahay inaad ka tagid qoyskaada ama qofka aad la nooshahay maadaama ey kuu hanjabaayaan, ku jir dilaayaan ama si xun kuula dhaqmaayaan adiga waxaad helikartaa

caawinaad inaad heshid guri dhifaacan oo ka heleysid xafiiska adeega bulshada. Meesha aad kala xiriireysid xafiiska adeega bulshada waxaad ka heli bogga internetka oo degmadaada. Adiga warbixintaas waxaa xitaa ka heli inta:

[www.kollpasoc.se](http://www.kollpasoc.se)

### **Ururka shaqaalaha - kaalmeeyn adiga oo shaqaalaha ah**

Haddii adiga si xun laguugu la dhaqmay markaa joogtay goobta shaqadaada ama markaa adiga shaqo codsaneysay adiga waxaad kaalmo iyo caawinaad ka heli ururka shaqaalaha midkood. Ururada shaqaalaha waxey u dhisanyahiin iney caawiyaan xubintooda sidey u helaan lolol wanaagsan intey shaqeeynaayaan. Ayaga waxey xitaa adiga kaa caawinkaran adiga haddii aad dooneysid inaad ashkoood u dirsatiid wakiilkha nooctakoorida ama boliiska. Shaqo-bixiyaha ma u bannaana inuu adiga kaa xajiro kamid noqoshaada ururka shaqaalaha oo dhammaan dadka waxey xaq u leeyahiin iney xubin ka noqdaan. Adiga waxaad u baahantahay inaad xubin ka ahaatid sidaa caawinaad wanaagsan uga heshid ayaga. Waxaa jiro ururo shaqaalaha oo kala duwan oo waxey ku xirantahay shaqadaa ka shaqeysid. Markaa adiga shaqo codsaneysid shaqo-bixiyaha adiga warbixin wuu kaa siin kara ururka shaqaalaha ey kamid yahiin sidaa adiga ula xiriirtid ayaga.

# SOMALISKA

**Beställ eller ladda ner materialet på:**

[www.mucf.se/publikationer](http://www.mucf.se/publikationer)

**Kontakt:**

Myndigheten för ungdoms- och civilsamhällesfrågor

Box 17801, 118 94 Stockholm

Telefon: 08-566 219 00. Webbplats: [www.mucf.se](http://www.mucf.se)

Text: MUCF och RFSL

Foto: White Box Studios

Grafisk form: Strawberry Lake

Tryckeri: EO Grafiska AB

© 2016 MUCF



**mucf  
.se** | Myndigheten för ungdoms-  
och civilsamhällesfrågor